

Xannaanada Caafimaadka ee Ontario: Helitaanka Xannaanada Guriga Dhexdiisa

Waxaa jira wakhtiyo ay dad badani u baahan karaan in laga caawiyo si ay gurayahooda ugu sii dhexnoolaadaan. Maxaad samaynaysaa, haddii adiga ama qof aad jeceshahay uu u baahdo xannaano guriga dhexdiisa ah? Xaashidan xaqiiqadu waa meel wanaagsan oo laga bilaabi karo. Waxaad meeshan ku-baran doontaa adeegyo badan oo xannaanada guriga dhexdiisa ah oo aad Ontaariyo ka heli karaysid. Waxaanu bogagga xiga ku soo bandhignay laba qaybood oo aad xogtan ka heli karaysid:

- Sida uu u shaqayo daryeelka guriga dhexdiisa laga bixiyo
- Sida loo-diyaarinayo daryeelka guriga dhexdiisa ah

Waxad xaashidan xaqiiqada oo luuqado badan ku-diyaarsan aad ka heli kartaa shabakadda internet-ka ee uu ciwaankeedu yahay ontario.ca/healthcarebasics. Waxaad dhag ka-siisaa (Click) furaha “Information in Other Languages”. Waxaa kale oo aad naqshadda internet-ka ka-baran doontaa sida aad xannaano caafimaad ugaga heli kartid gudaha Ontaariyo.

Sida ay xannaanada guriga dhexdiisa u shaqayso

1. Waa-maxay xannaanada guriga dhexdiisa ahi?

Adeegyada xannaanada guriga dhexdiisa ahi waxay dadka ka-caawinayaan in ay sii wataan caafimaadkooda iyo madax-bannaanidooda guriga dhexdiisa ah. Waxaa adeegyadan intooba badan fangarayso dawladda gobolka Ontaariyo.

2. Maxay yihiin adeegyada aan ku heli karo xannaanada guriga dhexdiisa lagu bixiyo?

Liiskani wuxuu soo-koobaya afar nooc oo waa-weyn oo ka mid ah adeegyada xannaanada guriga dhexdiisa lagu-bixiyo:

Helitaanka Adeegyada Xirfadlaha Caafimaadka

Adeegyadani waxay ku-caawin karaan kaddib marka aad cusbitaalka ka soo baxdid, ama haddii aad u baahatid in lagaa caawiyo xannuunka ama dhaawaca.

Yaa ku caawin kara: haddii aad adeegyadaasi xaq u yeelatid, Xarunta Xannaanada Bulshada Community Care Access Centre (CCAC) ee goobtaada ka-jirta ayaa kuu diyaarin karta xannaanada aad ka helaysid kal-kaaliyayaasha caafimaadka, xirfadlayaasha *Fiisiyoteeraabiga* iyo kuwa dawyeeya dhibaatooyinka caafimaad ee shaqada ka-yimaadda (occupational therapists), shaqaalaha bulshada, xirfadlayaasha qaabilsan baadhitaanka ciladaha ku-hadalka luuqadda qaabilsan iyo xirfadlayaasha cilmiga nafaqada iyo cunto-qaadashada.

Siday kuu caawin karaan:

- waxay baadhitaan ku-samaynayaa baahidaa
- waxay qorshaynayaan oo ay ku siinayaan xannaano, ama
- waxay ku-barayaan sida aad lafahaaga daryeelaysid

Waxaa kale oo aad heli karta alaabta iyo qalabka aad u baahan-tahay.

Xannaanada iyo Taageerada Shaqsiyeed

Adeegyadani waxay kaa caawin karaan hawlo badan oo dhinaca nolol-maalmeedka ah.

Yaa ku caawin kara: haddii aad adeegyadaasi xaq u yeelatid, Xarunta Xannaanada Bulshada Community Care Access Centre (CCAC) ee goobtaada ka-jirta ayaa kaa caawin karta sidii aad lahayd qof ku caawiya. Sida qaaliibka ah waxaa dadkan la yidhaahdaa shaqaalaha taageerada shakhsiyeed (support workers), caawiyayaasha xannaanada caafimaadka, shaqaalaha xannaanada shaqsiyeed, ama adeegyadaal.

Siday kuu caawin karaan:

- waxay kaa caawinayaan dhinaca nadaafadda shakhsiyeed, sida dhaqidda iyo qubayska, daryeelka afka, daryeelka timaha, daryeelka maqaarka ee ka-hortagga cudurada, daryeelka caadiga ee gacmaha iyo cagaha
- waxay kugu wareejinayaan ama ku saarayaan kuraasta, baabuurta ama sariiraha
- waxay labasashada iyo iska-saaridda dharka
- waxay kaa caawinayaan cunto-cunidda
- waxay kaa caawinayaan isticmaalidda suuliga
- waxay kuu raacayaan goobaha ballamaha

Hawlaha Guriga Dhexdiisa (Homemaking)

Adeegyada Hawlaha Guriga Dhexdiisa (Homemaking services) waxay kaa caawinayaan hawlaha caadiga ah ee guriga dhexdiisa laga qabto.

Yaa ku caawin kara: haddii aad adeegyadaasi xaq u yeelatid, Xarunta Xannaanada Bulshada Community Care Access Centre (CCAC) ee goobtaada ka-jirta ayaa kaa caawin karta sidii aad u heli lahayd qof ama shirkad adeegyadan ku siisa.

Siday kuu caawin karaan:

- waxay kaa caawinayaan qorshaynta shaxda noocyada cuntada (menu) iyo diyaarinta cuntada
- waxay kaa caawinayaan ka soo adeegidda suuqa
- waxay kaa caawinayaan nadiifinta fudud ee guriga iyo dhar-maydhka
- waxay kaa caawinayaan bixinta biilalka isticmaalka ama adeegyada baanka

Adeegyada Taageerada Bulshada (Community Support Services)

Adeegyadani waxay kaa caawinayaan si aad gurigaaga ugu noolaatid si ammaan ah iyo si madax-bannaan.

Yaa ku caawin kara: waxaad adeegyadan ka heli kartaa shirkadaha aan macaashka u shaqayn ama shirkadaha sida khaaska ah loo leeyahay.

Siday kuu caawin karaan:

- gaadiidka
- cuntooyinka
- taageerada xannaaneeyaha
- taageerada guriga
- barnaamijyada maalinta
- adeegyada bulsheed iyo kuwa madadaalada

3. Yaa bixinaya kharashka adeegyada xannaanada ee guriga dhexdiisa ah?

Waxaa jira habab badan oo loo-bixiyo kharashka adeegyada xannaanada guriga dhexdiisa ah: fangaraynta dawladda (Ontario and/or municipal governments)

- deeqaha loo-fidayo ururada rabitaankooda ku hawl-gala (kuwa sida-qaalibka ah adeegyada noocyadan oo kale ah bixiya)
- shirkadaha khaaska ah ee caymiska ama qorshayaasha faa'iidada (tusaale, caymiska khaaska ah ee caafimaadka)
- adiga oo kharashka iska-bixiya (tusaale, marka aad naftirkaagu iska-bixinaysid lacagta adeegyada laga-bixinayo)

Dad badan oo doonaya in ay guryahooda joogaan waxay diyaarsan doonaan adeegyo kala-duwan oo kharshkooda lagu bixin doono habab kala-duwan.

Sida aad u diyaarsanaysid adeegyada xannaanada guriga dhexdiisa ah

4. Sideebaan lafayga ama qofka aan jeclahay ugu heli karaa adeegyada xannaanada guriga dhexdiisa ah?

Xarunta Xannaanada Bulshada Community Care Access Centre (CCAC) goobtaada ka-jirta ayaa kaa caawin doonta:

- garashada baahidaada dhinaca xannaanada
- sahaminta ugu habboon ee wax-ka-qaban kara baahidaa iyo xaaladdaada
- ururinta xogta ku-saabsan qofka adeegyadan ku siin kara
- diyaarinta adeegyada aad codsatay

Qaadidda tallaabada ugu horaysaya, raadso Xarunta Xannaanada Bulshada ee kuugu dhaw [\(CCAC\)](#) .

5. Sideen ku ogaan karaa in aan u qalmo xannaanada guriga dhexdiisa ah ee ay lagu bixiyo kharashka dawladda iyo in kale?

Waxaad u baahan doontaa in aad la-xidhiidhid Xarunta Xannaanada Bulshada Community Care Access Centre (CCAC) goobtaada ka-jirta. Xaruntaaduna waxay go'aamin doontaa in aad u qalmi karaysid xannaanada guriga dhexdiisa ah ee dawladdu lacagtiisa bixiso iyo in kale.

6. Haddii aanan u qalmin fangaraynta dawladda, sideen caawimaad ku heli karaa?

Waxaad qasab kugu noqon doonta in aad iska-bixisid lacagta adeegyada aad u baahan-tahay. Waxaad codsigaaga toos ugu gudbisan kartaa dadka ama shirkadaha aad dooranaysid. Xarunta Xannaanada Bulshada Community Care Access Centre (CCAC) goobtaada ka-jirta ayaa kaa caawin karta helitaanka adeegyada.

7. Waxaan qabaa su'aalo ku-saabsan habka xannaanada caafimaadka ee ka-jira Ontaariyo. Hadaba yaan wici karaa?

L-xidhiidh "ServiceOntario, INFOline" inta u dhaxaysa 8:30 am (aroornimo) illaa 5:00 pm (galabnimo). Shaqaalaha waxay awoodi doonaan in ay luuqadda Ingiriisiga, Fransiiska iyo 20 luuqadood oo kale kugu caawiyaan. Soo-wac:

- 1-866-532-3161
- TTY 1-800-387-5559
- Gudaha Toronto, TTY 416-327-4282.

Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa health.gov.on.ca